

# Waa maxay Deeqda waxbarashada College Bound?

College Bound waa balan qaad hore ee kaalmooyinka maaliyadeed ee gobolka ee ardayda u qalanta kuwaasoo iska dhiwaangeliyay dugsiga dhexe oo na fullisid balanqaadka College Bound.

**College Bound** wuxuu isku daraa kaalmooyinka maaliyadeed ee kale ee gobolka si loo daboolo kharashka waxbarashada isku celceliska (qiimooyinka kulliyada dadweynaha), qidmooyinka qaar, iyo gunno yar ee buugga. Waxaad ka heli kartaa shahaado la ansixiyay ama digrii in ka badan 60 dugsiiyo oo u qalma gudaha Washington. Tani waxaa ku jiro kulliyadaha dadweynaha iyo kuwa gaarka ah oo labo iyo afar sanno ah, kulliyadaha farsamada, iyo dugsiyada shaqada gaarka ah. Ka raadi liiska dugsiyada ka qeybqaadanayo halkan [www.collegebound.wa.gov](http://www.collegebound.wa.gov).

## Aniga miyaan u qalmaa?

Codso haddii aad ku jirtid fasalka 7aad ama 8aad oo na buuxiso mid ka mid ah sharuudaha soo socdo:

- ▶ Qoyskaaga wuxuu buuxiyaa sharuudaha daqliga ee jadwalka hoose.
- ▶ Aad ku jirtid daryeelka koriyaha ama ku tiirsantahay gobolka.
- ▶ Qoyskaaga wuxuu helaa cuntada muhiimka ah ama faa'idooyinka TANF.

## 2018-19 Jadwalka Daqliga

Cabirka qoyska	Jaheynad a Daqliga Sannadla ha*	Daqliga Bil-laha	Daqliga Isbuuca ha
2	\$30,451	\$2,538	\$586
3	\$38,443	\$3204	\$740
4	\$46,435	\$3,870	\$893
5	\$54,427	\$4,536	\$1,047
6	\$62,419	\$5,202	\$1,201
Qoys walboo oo dheeraad ah	Ku dar \$7,992	Ku dar \$666	Ku dar \$154

\*Daqliga qoyska waa inuu ka yaraadaa ama la mid ahaadaa tiradaan.

Deeqda waxbarashada College Bound waa barnaamij gobolka maalgeliyay ee ay maamulaan Gollaha Guusha Ardayda Washington. Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan barnaamijka iyo ku saabsan dooqyada kale ee gargaarka maaliyadeed ee Washington, booqo [www.readysetgrad.org](http://www.readysetgrad.org), ama nagala soo xiriir i-meelka [collegebound@wsac.wa.gov](mailto:collegebound@wsac.wa.gov), ama taleefon ahaan 888-535-0747, dooqa 1.

## Sidee ayaan u codsadaa?

Waxaad ka codsan kartaa onleenka [www.collegebound.wa.gov](http://www.collegebound.wa.gov). Ka hubso la taliyaha dugsigaaga; waxaa laga yaabaa inay kaaga bilaabeen coodsi dugsiga.

## Miyay jirtaa waqti ugu dambeyn ah?

Haa! Waa inaad codsataa Juun 30 ee dhammaadka sannadka fasalkaaga 8aad.

## Waa maxay balanqaadka?

Ardaydqa College Bound waxay balan qaadayaan inay:

- ▶ Ka qalin jabiyaan dugsiga sare ee Gobolka Washington ama dugsiga guriga iyagoo leh isku darka 2.0 GPA ama in ka sareeyo.
- ▶ Codsadaan kulliyada.
- ▶ Gudbiyaan FAFSA (Codsiga Bilaashka ee Gargaarka Ardayda Faderaalka) ama WASFA (Codsiga Washington ee Gargaarka Maliyadeed ee Gobolka) sida ugu dhakhsaha badan kadib Oktoobar 1 oo na suurtoogalka ah gudaha sannadkaaga ugu dambeeya ee dugsiga sare.
- ▶ Laheyn xukunada dambiga.

## Sidee ayaan ku ogaanayaa haddii aan si guul ah u codsaday?

Markii codsiga College Bound la bilaabo, waxaad heleysaa Warqada Warbixinta Maqan (MIL) taasi waxay u baahneysaa saxiixa waalidka iyo ardayga labadaba, waxaad u baahan kartaa inaad la hubisid sharuuda u qalmida ee aad buuxisay. Markii codsiga la dhameystiro, waxaad boostada ku heli donntaa shahaadada College Bound.

## Kadib maxaa dhacaayo?

Markii aad dhameystirto codsigaaga College Bound oo aad shahaadada heshid, shaqaalaha barnaamijka wuxuu sii wadayaa inuu ku xasuusiyo warbixinaada iyo aqbaarraha muhiimka ah.

## Sidee ayaan u helayaa deeqda waxbarashada?

- ▶ Fulli sharuudaha balanqaadka deeqda waxbarashada oo buuxi sharuudaha daganaanta gobolka.
- ▶ Xarey FAFSA ama WASFA sannadkaaga u dambeeya ee dugsiga iyo sannad walba ee kulliyadaada si loo go'aansado u qalmida daqliga.
- ▶ Ha lagaa aqbaloo oo ka qeybgal kulliyad u qalanto.
- ▶ Ku fiicnaaw kulliyadaada.

